Somali

# Fitzroy Legal Service

**Level 4, Fitzroy Town Hall, Fitzroy, Victoria 3065. Waxaa laga soo geli karaa laneway and courtyard oo ku yaalla 126 Moor St, kana dambeeya Maktabada Fitzroy. Tel: (03) 9419 3744. Khariidadu waxay ku taalla xaashida gadaasheeda.**

**Muhiim:** Waxaan helli karaa mutarjumiin. Fadlan daabac oo horay u soo qaad dhamaan dukumiintiyada.
Kuma aanu bixino talo sharciyeed telefoonka ama e-mail. Talo telefoon oo degdeg ah, wac telefoonka 1300 792 387.

**Adeegyada Goobta**

**Hawsha maalmeed. Isniinta ilaa Jimcaha 9 subaxii ilaa 5 galabtii. Waxaa la xiraa 1da - 2da duhurkii. Arrimaha sharci ahaan lagaala talinayo ama adeega lacagta la bixinayo. Ballan keliya.** Caawimada sharci iyo wakiilada eedaynta dembiyeed, dalabyada damiinka, gafafka gaari wadida, ganaaxa, dhibanaha dembiga, Maxkamada carruurta (Dembi) sharciga qoyska iyo arrimaha rabshada qoyska.

**Adeega Talada Sharciga ee aan balanta u baahnayn. Isniinta ilaa Khamiista, laga bilaabo 6.00 fiidkii, Jimcaha, laga bilaabo 6:30 fiidkii.** Lacag la'aan**.** Ballan looma baahna, laakiin codsiga oo badan dartiis, ma jiraan macaamiil cusub oo lagu arkayo wixii ka dambeeya 7da fiidkii. Waxaanu bixin karaa talo la xiriirta dembiga iyo arrimaha madaniga ah oo ay ku jiraan arrimaha booliiska, shilalka baabuurta, ganaaxyada, tegida maxkamada, dhibaatooyinka macmiilaha, sharciga qoyska iyo rabshada qoyska.

Talo kama aanu bixin karo: arrimaha socdaalka, heshiisyada ganacsiga, arrimaha ganacsiga iyo shuruucda, khilaafka dhismaha, hanti-kala-wareejinta, maalgelinta/masuuliyad-qaadka (trusts), Maxkamada sarre ama Arrimaha Maxkamada Sarre, cashuurta/superannuation-ka ama caawimada qorista dhaxalka. Waxaanu bixin karnaa xawilaad wixii khuseeya arrimahaan.

**Goobaha Hawsha:**

| | | |
|---|---|---|
| **Goobta sharciga Qoyska. Talaadooyinka iyo Khamiisaha 6:30galabtii. Lacag la'aan. Ballan keliya.**<br><br>Talada takhasuska ah ee arrimaha sharciga qoyska, taas oo ay ku jiraan arimaha sharciga qoyska ee khuseeya arrimaha hantida. | **Talada Sharciga ah ee LGBTIQ+. Khamiista ugu horraysa bil walba, laga bilaabo 6:30 galabtii. Lacag la'aan laakiin ballan keliya.** Garyaqaano takhasus ah iyo sharci-ka-warhaye (para-legal) ayaa bixiya talo iyo xawilaad la xiriirta arimaha sharciga qoyska. | **Goobta sharciga xayawaanka. Arbacooyinka, laga bilaabo 6:30fiidkii. Lacag la'aan. Ballan keliya.** Adeega garyaqaanada xayawaanka, waxay lagu bixiyaa talo sharciyeed oo la xiriirta arimaha xayawaanka, iyo talada u xawilida kooxaha samafalka xayawaanka iyo xarakaadyada xuquuqda xayawaanka. |

**Somali**

**Adeegyada dibada ah**

Wac miiska soo dhowaynta tel: 9419 3477 wixii macluumaad ah oo ku saabsan adeegyadeena ku yaalla meel halkaan ka baxsan.

**Xarunta Neighbourhood Justice Centre.** 241 Wellington Street Collingwood.

**Outreach:**

| | | |
|---|---|---|
| **Family Violence Outreach, gooba kala duwan. Lacag la'aan. Ballan keliya.** Kaalmada sharciga wixii la xiriira sharciga qoyska iyo rabshada qoyska. La xiriir garyaqaanadayada Rabshada Qoyska wixii macluumaad dheeraad ah. | **Richmond Outreach North Richmond Community Health Centre, 23 Lennox St, Richmond. Ballan keliya.** Waxaanu siin karnaa isla talada arrimaha lagaga hadlay Adeegayaga Talada Sharciga ee aan ballanta u baahnayn. | **Drug Outreach Lawyer, Gooba kala duwan. Lacag la'aan.** Caawinta shakhsiyaadka qaba dhbaato sharci oo la xiriirta daroogada. La xiriir Garyaqaanka Uga-gargaarida daroogada macluumaad intaas ka badan. |

**Waxbarashada Sharciga:**

| | |
|---|---|
| **Buugga Sharciga (The Law Handbook)** Tuse sharci oo sahlan ee sharciga Fiktooriya. Ka gal online-ka: www.lawhandbook.org.au ama ka gado koobiga, cutubyo gaara, ama eBook oo laga hello http://www.fitzroy-legal.org.au/store | **Waxbarashada Sharciga ee Bulshada** Fadhiyada macluumaadka kooxaha bulshada, shaqaalaha bulshada, kooxaha kale ee Degmada Yarra. La xiriir Sarkaalka macluumaadka Horumarinta Bulshada. |

**Sidee nagu hellaysaa**

Adeega Sharciga Fitzroy wuxuu ku yaalla dabaqa 4aad, 4 Fitzroy Town Hall. Ka soo gal Laneway and Courtyard 126 Moor St, oo ka dambeeya Maktabada Fitzroy.




Wac 004# intercom-ka miiska soo dhiwaynta kala soo gal wiishaka.

**Gaadiidka dadweynaha**

**Baska** 200 - 207. Johnston St/ Napier St stop. 5 daqiiqo oo socod ah oo ku yaalla Napier Street.

**Taraamada:**

Route 11. Stop 14. (3 daqiiqo ayaa looga soconayaa wadada Brunswick St iyo Moor St)

Route 86. Stop 13. (6 daqiiqo ayaa looga soconayaa Smith St iyo Moor St)

Route 96. Stop 14. (7 daqiiqo ayaa looga soconayaa Nicholson iyo Moor St)